## QAYBTA KOWAAD

### ANIGA IYO XABSIGII NSS-TA.

Waxaan ahaa nin dhalin yar, dhuuban oo timo afro ah la baxay oo dhamaystay sanadkii shaqada qaranka 1977-1978, halkaas oo aan macalin dugsiga dhexe ee Qardho ka soo noqday. Berigaas arday kasta oo so dhameeya dugsiga sare, waxaa la geli jiray xeradii Xalane (Botego), oo muddo saddex bilood ah lagu baran jiray tababar ciidanimo. Anigu waxaan ahaa qaybta madaafiicda iyo Taangiyadda, ka dibna 9 bilood oo aad ahaanaysid macalin dugsiyadda dhexe ee dalka.

Sanadkii shaqadii qaranka waxay iisoo dhamaatay bishii August 1978, waxaan usoo safray Xamar, halkaas oo la igu qoray in aan gallo kulliyadii Macalimiinta Farsamada ee loo yaqiin "polytechnique."

Xamar iguma cusbayn, oo waxaan ku so koray xaafadda Waaberi oo ahayd meeshii aan ka bilaabay barashada Quraanka , dugsi Quraankii ku dhowaa ceelkii ratigu biyaha kasoo saari jiray ee Cabdalla Calasow! Taasoo si fiican xusuustayda ugu xardhan ilaa hadda.

Caruurnimadii aan Xamar ku qaatay waxay ahayd waqti aad u fiican. Ciyaal-ciyaareedka aan ku dheeli jirnay waxay ahayd dhumaalaysi, taasoo qofka indha laga xiraayo , asxaabta kalena way dhuumanayaan , kadibna waxaa laga furaya indhaha , waana in uu raadiyo ciyaalkii dhuuntay!Kii laso qabto, ayaa bedelaaya oo indhaha laga xiraya. Guusha waxaa qaata malintaas qofkii aan marna indhaha laga xirin. Kubad ciyaar "Bugle"i aadis tii Buur Karoore iyo Geed Jinn, xeebta badda ee Liido oo aan u dhuuman jiray, sababtoo ah dabaasha badda si fiican uma aqoon oo waxaan ka imid Qardho oo aan bad lahayn. Aabbe iima ogolayn, hadana waan u dhuuman jiray oo xeebta inta laguha ma dhaafi jirin!

Xaafadda Waberi guryuhu waxay u badnaayeen carshaan xaarka lo’da lagu malaaqay, guryo barako ah; runtii dadku wax badan ma

haysan, balse derisku waa isjeclaa oo nolol farxad leh baa lagu wada noolaa. Waxyaalaha aan la yaabi jiray waxay ahayd sida subaxdii laysu salaamaya: "Haye ma barideen," "Khayr malagu beryinoo." Sidee la yahay? "Waxay ahaayeen weeraha ugu badan oo subaxdii marka aan Madarasad u socdo dhegahaygu maqli jireen!"

Markii aan ku soo noqday Moqdisho, aniga, nin wayn oo jaamacad gelaya , waxaan rajo fiican ka qabay in aan ka rumeeyo riyadaydii ahayd dhammaystiro jaamacadda.

Waxaan bilaabay “Kulliyadii Waxbarasha macalimiinta dugsiyadda Farsamada (Technical Teacher’s College of Education)" Bishii August 1988. Hogya Ardaydu waxaa uu ahaa Dugsiga Farsamada Gacanta ee KM4 ku dhowaa ama dugsii Kuuriyada Waqooyi, sida loo yaqaan. Duruustana waxaanu ku baran jirnay ex-dugsigii Farsamada ee Industrialle, kuna dhowa garoonkii kubadda cagta ee Koonis Stadium.

Subaxdii arday waxaa na qaadi jiray dharw bas oo madaw-buluugga ahaa ee Abuu-Raas.

Himilo iyo dadaal baa igu jiray, taasoo ay shidaal u ahayd, in ardayda ugu fiican loo qaadi doono laba sano oo waxbarasho Garman-Galbeed.

Mogadishu berigaas waxay ahayd mararkii ay ugu quruxda badnayd; saaxiibo badan baan isbaranay oo afarta kooni oo Soomaaliya kawada yimid. Waqtigu wuxuu noo ahaa mid aad u fiican oo farxad badan. Tamashlayn Moqdishu, fiidkii hadba Cinemo gal iyo filimkee, Gabdho shukaansi iyo aakhir asbuuca oo aan aadi jiray meelaha kalaabka sida Jubba, Caruuba, Liido, iwm.

Sanadkii kowaad ee kulliyadda waxay igu dhaaftay deg deg iyadoo wax imtixaan ah aan laygu celin. waxaan u gudbay sanadkii labaad, taasoo aan ka qalin jebin doono “Haddii Alle Idmi" bisha Agosto ama Sepetember!

Moxamed Abdi Aynab waa macalin dugsi-yadda Farsamada oo Jaamici ah; waxay ahayd weedha aan sugaayo inl aygu yeero

dhowaan! Waxaan ka qaadi jiray weedhaas dhiirigelin baaxad wayn.

Waxay ahayd maalin Talaado ah oo bishu ahayd 29/01/1980. Waxaan ku jiray xisad thermodynamics ah, oo uu dhigay Eng. Ahmed Kaahiye "Bicolo", ayaa si lama filaan ah hormuudkii (dean-kii) kulliyadda, oo ahaa Eng. Afey albaabka soo qaraacay. Dhammaan ardaydii waxay eegeen dhankii sharqanta albaabka. Markii uu salaamay macallinkii xisadda ku jiray, waxa uu la soo baxay warqad wuxuuna yiri: "Aaway Maxamed Cabdi Caynab? In kasta oo aanan dareemaynin wax walwal ah bilowgii, waxaan is weydiiyay, "Maxay tahay waxa Afey iga rabo maanta?" "Waxaan ka yaabay Dean-ka i raadinaya! Waxyaalo badan ayaa maskaxdayda ku soo dhacay, balse aniga oo aan wax welwel ah qabin ayaan ku iri, "Waa aniga."

Waxa uu yiri, "Soo bax," isaga oo intaa ku daray, "Soo qaado buugtaada." Waxaan is-weydiiyay sababta uu ii yiri: 'Buugta soo qaado!Wax Dareen ah igu ma jirin markaas.  Nin faraxsan ayaan iska ahaa. Waxaan ka soo baxay fasalka aan ku jiray. Eng. Afey ayaa i horkacaya oo aan daba socdaa. Afey. Markii aan ku soo dhowaannay xafiiskii madaxa kulliyadda, waxaan arkay ilaa toddoba nin oo hor dhooban xafiiskii madaxa kulliyadda. Markii aan la sinna, ayuu Afey ku yiri raggii, "Waa kan Maxamed Cabdi Caynab."

Inta ay isoo wada fiiriyeen ayaa nin gaaban oo maarriin ah, indho cas, af-guriga waqooyina ku hadlaya igu yiri, "Fuul gaadhigaas!" Isagu waxa uu markaas ii tilmaamay gaari meel dhow yiil oo noociisu ahaa Land Rover (Familiare).

Markii aan galay, kuraasta dhexe ayay labo nin labada dhinac iga kala fariisteen. Qaar kale waxay fariisteen kuraasta dambe (post-cane). Sidii aan u soconnay, laga soo dhaqaaqo dugsigii Ex. Industrial, dekadda la soo hor maro, dariiqa dheer ee hor marayay Jubba, waxa aannu ka dhacnay ilaa iyo Boondheere iyo Godka Nssta ee Jilacow (xabsi). Albaabkii waynaa ee casaanka ahaa baa la furay, gudaha baan u galnay.

La iga ma dejin baabuurkii, waana iska fadhiyey. Waxaa ka degay ninkii gaabnaa ee watay toddobada nin iyo dhawr kale oo NSS ah. Waxaa la yiraahdo "Colonel Cabdullaahi Ismaciil Cirro gadaal baan ka baranaya magaciisa. " Wuxuu galay qol ka mid ah xafiisyadii meesha ku yaallay. Cabbaar dabadeed, Cabdullaahi waa soo noqday. Waxa uu igu yiri, “Waxaanu doonaynaa in aad na gayso qolkii aad ka degganayd kuliyadda, qaybta hurdada. Ujeedkoodu waa in ay soo baaraan, si cad bayna iigu sheegeen. Su’aal ayaan ku celiyey, aniga oo leh, "Oo maxaad ka soo baaraysaan?” Si jeesjees ah oo islawayni ku irto ayuu iigu jawaabay. Waxa uu igu yiri: “Adiga ayaa ogaan doonaa haddii aadan hadda garanayn waxaa aan baaraynno!” Cabdullaahi Ismaciil Cirro baa sidaas igu yiri. Aniga xaalku waa i la sahlanyahay, oo arrinku waa meeshii laga yiri, “Libaax nin aan aqoon baa lax ka rita.”

Machadkii Farsamada ayaannu dib ugu soo laabannay. Qolkii aan ka degganaa ayay baaritaan ugu dhaqaaqeen. Meel kasta oo uu agab yiil iyo xagal kasta oo qolku lahaa ayay faraha la galeen. Howsha toddobadoodiiba waa hayeen, oo sidii qof denbiile ah oo denbi-baaristu heshey, ayay u dhaqmayeen. Maba mooddid in la dhex joogo xarun waxbarasho! Marka ay xaaladdu caynkaas tahay, anigu fajac iyo amakaag ayaan ku sugnahay! Si la yaab leh ayaan u daawanayay ficilladooda. Wax kasta oo gacantoodu qabato waa ay tuurayeen: buugag, kutubbo, dhar, kabo, iyo wixii agab ahaa oo qolka ii yiil. Xataa kitaab Quraan ah oo miiska dushiisa ii saarnaa way turen! Markaas ayaan inta kitaabkii dhulka ka soo qaaday si hoose u iri, "Inkaar idin ku dhacday!” Hoos u hadalkaygu waxa uu ahaa mid aan sina loo maqli karin. Dabcan, markaas waan dareemay in aan af libaax ku jiro.

In kasta oo qol qura uu ahaa meesha ay wax ka baarayeen, muddo aan yarayn ayay ku qaadatay si ay u helaan wax dembi-u-yaal ah oo ay igu ciqaabaan. Handadaad iyo cagajugleyn ayay igu hayeen muddadii uu baaritaanku socdey. Laakiin xaqiiqadu waxay ahayd in aan anigu ahaa arday la mid ah boqollaalka ardayda ee Machadka dhiganayay.